

CODSIGA CAFINTA

Waaxda Shaqaalaha ee Mareykanka ayaa siisay wakaaladaha gobolka awood ay ku cafiyaan dib-u-bixinta lacagaha xad-dhaafka ah ee caymiska shaqa-la'aanta iyadoo la eegayo xaalado gaar ah inta lagu gudajiro safmareenka. Ma ahan inaad dib-u-bixisid macaashyada xad-dhaafka ah haddii aad ka heshay macaashyada shaqa-la'aanta mid ka mid ah barnaamijyada macaashka degdega ah ee safmareenka ee dawladda **oo** la go'aamiyo in bixinta macaashyadaan **aadan** khalad ku lahayn **oo** dib-u-bixinta lacagta ay kuu abuureyso dhibaato la taaban karo.

Tani waxay ka dhigan tahay inaad codsan karto cafin haddii Waaxda Shaqaalaynta ay ku siisay macaashyada Magdhowga Shaqa-la'aanta Safmareenka ee Degdega ah (PEUC), Magdhowga Shaqa-la'aanta Safmareenka ee Dawladda (FPUC), Kaalmada Shaqa-la'aanta Safmareenka (PUA), ama Kaalmada Mushaar La'aanta (LWA) oo mar dambe la ogaaday runtii inaad **u-qalmin** macaashyadaas (sidoo kale loo yaqaano "lacag-bixin xad-dhaaf ah"). Kadib markaad gudbisno cafinta, waxaan go'aamin doonaa in sharciga dawladda kuu oggolaanayo **inaadan** dib-u-bixin lacag-bixinta xad-dhaafka ah (sidoo kale loo yaqaan "cafinta dib-u-bixinta").

Tusaalooyinka sababaha aad ugu qalmi karto in lagaa cafiyo lacag-bixinta xad-dhaafka ah waxaa ka mid ah:

1. Waaxda Shaqaalaynta inay gashay khaladka socodsiinta qaansheegashadaada.
2. Waaxda Shaqaalaynta inay gelisay macaashyada qaansheegasho aan sax ahayn.
3. Aadan adigu sababin lacag-bixinta xad-dhaafka ah oo dib-u-bixinta lacagta ka dhignaan doonto in adiga ama qoyskaaga aad waysaan baahiyaha aasaasiga ah.
4. Aadan adigu sababin lacag-bixinta xad-dhaafka ah oo aad qabto xaalad caafimaad ama naafonimo taasoo ka dhigaysa dib-u-bixinta lacagta mid dhibaato ah.

**Si aad u codsato cafin, buuxi foomka hoose oo u gudbi
OED_OVERPAYMENT_UNIT@oregon.gov.**

**Waxaad sidoo kale ku soo gudbin kartaa foomka fakiska:
(503) 947-1811 ama**

**Boosto ku socota:
Oregon Employment Department
PO Box 14130, Salem OR 97309**

Fadlan la soco inaad heli doonin xaqiijin haddii aad foomkaaga ku soo dirto fakis ama boosto.

- | |
|---|
| 1. Ma shaqaysaa hadda? Haa Maya
Hadday maya tahay, shaqa-la'aantaadu ma waxaa ugu wacan safmareenka COVID - 19? Haa Maya |
| 2. Sidee dib-u-bixinta lacag-bixintan xa-dhaafka ah dhib idin kugu abuureysaa adiga ama qoyskaaga? |
| 3. Helitaanka macaashyadaan ma sababaya inaad sameyso wax aadan sameyn lahayn haddii aadan helin macaashyada? Hadday haa tahay, sidee? Haa Maya |

4. Miyuu go'aankaagu sii adkaynaysaa maadaama aad heshay macaashyadaan? Hadday haa tahay, sidee?	Haa	Maya
5. Ma qabtaa xaalad caafimaad ama naafonimo taasoo ka dhigaysa dib-u-bixinta lacagta mid dhibaato ah?	Haa	Maya
6. Ma haysataa lacag si aad dib u bixiso lacagtan xad-dhaafka ah?	Haa	Maya
7. Haddii ay tahay inaad dib u bixiso lacagta xad-dhaafka ah, waa maxay baahiyaha ay tahay inaad adiga ama qoyskaagu waysaan (calaamadee dhammaan inta ku khuseyso)? Kirada/Amaahda Guryaha Daryeelka Ilmaha Cuntada Daryeelka Caafimaadka Wax kale (waa in la qoro):		
8. Macluumaadka dheeraadka ah ee adiga iyo qoyskaaga idinku saabsan oo aad jeceshahay inaan tixgeli-no markaan go'aan ka gaareyno inaad u-qalmato in lagaa cafiyo dib-u-bixinta lacagta xad-dhaafka ah. Fadlan la soco in sababahaagu ay ku jiraan sida aadan khaladka ugu lahayn iyo sida dib-u-bixinta lacagta xad-dhaafka ah ay uga hor imaanayso xaqsoorka iyo damiirka suuban (eeg sababaha kor ku xusan).		
Waxay qaadan kartaa 2-3 toddobaad laga bilaabo taariikhda aan helnay codsigaaga ilaa go'aanka lagugu soo dirayo boostada. Ha soo gudbin codsiyo badan ama ha na weydiinin xaaladda codsigaaga ilaa afar toddobaad laga gudbay oo aadan wali helin wax go'aan ah. Waan kula soo xiriiri doonaa haddii aan u baahano macluumaad dheeraad ah. Waxaa jiri doona macluumaad ku jira go'aankaaga oo kuu sheegi doona waxaad sameyn lahayd haddii aadan waafaqsaneyn go'aanka aan soo saarnay.		
Waad codsan kartaa i lagaa caawiyo dhammaystirka foomkan adoo adeegsanaya boggayaga Nala Soo Xiriir haddii aad u baahan tahay foomka oo qaab kale ah.		
Waxda Shaqaalaynta Oregon waa bixiyaha shaqo ama barnaamij loo siman yahay. Qalabka iyo adeegyada naafada ayaa la heli karaa marka ay codsadaan shaqsiyaadka naafada ah. Caawin luuqadeed ayaa loogu heli karaa dadka aan si faseex ah ugu hadlin Ingiriisiga si lacag la'aan ah		
Macluumaadka kor ku xusan waxaan u bixiyay si ikhtiyaari ah waxaana codsanayaa in la iga cafiyo dib-u-bixinta uu iga rabo Gobolka Oregon. Waxaan cadeynayaa in macluumaadka aan bixiyay run iyo sax yahay inta aan ogahay		
Saxiixa Qaansheegtaha _____	Taariikhda _____	
Qor Magaca _____	Lam. Telefoonka _____	
Lambarka Aqoonsiga Macmiilka (CID#): _____		